


## Baaritaanka luqadda

Hoggaanka Socdaalka ee Finland waxaa uu kuugu yeeray arrinka ku saabsan baaritaanka luqadda.

Ujeeddada baaritaanka luqadda waa in la xaqiijyo ama la hubiyo in aad dhab ahaan ka timid degaanka aad sheegtay in aad ka soo jeedo.



Kulanka inta uu socdo, qof shaqaale ah oo ka tirsan Hoggaanka socdaalka ayaa duubi doona hadalkaaga qiyaastii muddo dhan 20 daqiiqo. Inta badan kulankaan turjubaan lama qabto.

## Sidan soo socota ayuu kulanku u dhacayaa

1. Shaqaalaha Hoggaanka Socdaalka ayaa kuu sheegi doona marka duubista codkaaga la bilaabaayo. Inta duubistu ay socoto qofka shaqaalaha ah ma hadli karo.

2. Ku hadal cod la maqli karo qiyaastii muddo 20 daqiiqo ah, adigoo ka hadlaaya mowduuc aad taqaanno. Adiga ayaa dooranaaya waxa aad ka hadlaysid. Mowduucyada fiican ee laga hadli karo waxaa ka mid ah tusaale ahaan: bay'adda ama degaanka, cuntada, isboortiga, muusigga, iyo filimmada. Waxaad sidoo kale ka hadli kartaa waxyaabaha aad ka taqaan dalkaan Finland.

- Ha sheegin wax ku saabsan macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed, sida magacaaga, ama magacyada xubnaha qoyskaaga, amaba macluumaad kale oo adiga ama qoyskaaga lagu aqoonsan karo. Sidoo kale ha sheegin sababaha aad ku salaysay codiskaaga magangelyoddoonista.
- Lagaagama baahna in aad ka hadasho hal mowduuc oo keliya, ee haddii aad doonayso mowduuca waad beddeli kartaa inta duubistu socoto. Arrinka ugu muhiimsan waa in aad hadasho muddada duubistu ay socoto oo dhan.

3. Shaqaalaha Hoggaanka Socdaalka ayaa kuu sheegi doona marka duubistu dhammaato, markaas ayaadna hadalka joojin kartaa.

## Maxaa dhacaya baaritaanka luqadda ka dib?

Kulanka kaddib, Hoggaanka Socdaalka waxaa uu duubista codka u gudbinayaa qof khabiir ah, kaasoo baaritaan ku samayn doona hadalkaaga. Intaas kaddib, natiijada baaritaanka luqadda waxaa qoraal ahaan loogu soo gudbinayaa Hoggaanka Socdaalka.

Haddii natiijada baaritaanka luqadda ay ka hortimaaddo ama ay noqoto mid khilaafsan wixii hore ee aad ka sheegtay meesha aad ka timid, Hoggaanka Socdaalka waxaa uu kula yeelanayaa waraysi af-ahaan ama qoraal ahaan ah. Waraysigaas lagula yeelanaayo waxaad heli doontaa fursad aad arrimahaaga ku sharrixi karto.

Haddii natiijada baaritaanka luqadda aysan ka horimaanayn ama khilaafsanayn wixii aad hore u sheegtay, si gaar ah laguuguma sheegaayo natiijada baaritaanka. Natiijada baaritaanka luqadda waxaad ka arki doontaa go'aanka adiga ku khuseeya.